SOOMAALIYA 2017 WARBIXINTA CAALAMIGA AH EE XORIYADA DIINTA

Warbixin Kooban

Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah (DFK) waxa uu siiyaa shaqsiyaadka xaqqa ay u leeyihiin in ay ku dhaqmaan diintooda, waxa uuna ka dhigayaa Islaamka diinta dalka, waxa uu mamnuucayaa fidinta diin kale oo aan aheyn diinta islaamka, waxa uuna ogolaanayaa in dhamaan sharciyadu ay racaan mabaadiida guud ee Islaamka. Dowlada federaalku waxa ay laheyd awood kooban oo ay ku dhaqan galiso DFK meel ka baxasan Muqdisho, sida badan meelaha kale ee dalku waa ay ka baxsanaayeen gacan ku heeynteeda. Dowlada federaalka iyo maamul goboleedyada ku meel gaarka ah, oo ay ku jiraan Somaliland, Puntland, Maamulka ku meel gaarka ah ee Jubaland(MKJ), Maamulka ku meel gaarka ah ee Koofur Galbeed(MKKG), maamulka ku meel gaarka ah ee Hirshabeele iyo mamulka ku meel gaarka ah ee Galmudug (MKG), waxa ay xukumayeen dagaanadooda iyagoo u maraya shaciyada maxaliga ah laakiin si buuxda gacanta uguma aanay heeyn. Dastuurada Somaliland iyo Puntland waxa ay ku dhawaaqeen in Islaamku yahay diinta dalka, waxa ayna ka mamnuucaan in dadka muslimka ah in ay qaataan diin kale, waxa ayna reebayaan in la fidiyo diin kale oo aan aheyn tan Islaamka, waxa ayna waajib ka dhigayaan in dhamaan sharuucdu ay waafaqaan mabaadiida guud ee shareecada. Intii lagu jiray bishii Luulyo masuuliyiinta Somaliland waxa ay xireen kaniisada kaliya ee Kaatoolikada ah ee ku taalay gudaha Hargeysa, Kaniisada waxaa dib loo furay Oktoobar 2016. Bishii Meey wasiirka waxbarashada, dhaqanka iyo tacliinta sare ayaa daaha ka qaaday Qaabka Manaahijta Qaran ee dugsiyada hoose iyo sare ee gaarka ah iyo kuwa dadweynaha, kaas oo uu wasiirku sheegay inuu qeyb ka ahaa in si wanaagsan loo habeeyo waxbarashada Islaamiga ah.

Kooxda argaixisada ah ee al-Shabaab waxa ay dileen, naafeeyeen ama ay qashqashaadeen shaqsiyaad lagu tuhmay in ay ka baxeen Islaamka ama kuwa ku guul dareeystay in ay raacaan awaamiirta diineed ee kooxda. Intii lagu jiray sandka al-Shabaab waxa ay masuul ka ahayd dilka dad rayid ah, Saraakiil dowladeed, xubnaha baarlamaanka, xoogga dalka Soomaalieed iyo boliiska, iyo ciidamo ka socda wadamada u soo dira ciidamada Howlgalka Midawga Afrika ee Somaliya (AMISOM). Al-Shabaab waxa ay sii waday olololheeda ay ku tilmaameyso ciidamada nabad ilaalinta ee AMISOM in ay yihiin “Masiixiyiin” u dan leh qabsashada iyo heysashada dalka. Sida laga soo xigtay warbixino lagu soo qoray Morning Start News, intii lagu jiray Febraayo ciidamada al-Shabaab waxa ay dileen Fadumo Cismaan iyo wiilkeeda oo 11 sano jir ahaa oo si sir ah u galay

Masiixiyadda kan abaxay Ismaanka waxa ayna dhaawaceen odaygeeda. Intii lagu jiray Juune dagaamayaal al-Shabaab ah ayaa u dhacay saldhig ciidan oo ku yaalay Puntland, iyaga oo dilay 70 qof dhaawacayna daraasiin kale. Al-Shabaab waxa ay sheegtay in ay weerareen saldhiga sababatoo ah waxaa joogay ciidamo ajaanib ah iyo kuwa "ridoobay" ee Puntland. Dagaalamayaal olog la ah ISIS ayaa sii waday joogitaankooda gobolada waqooyiga ee Puntland.

Waxaa jira cadaadis bulsho oo xoog leh oo ah in la qaato dhaqanda Islaamka Sunniga ah. In laga baxo Islaamka lana qaato diin kale waa mid aan bulshadu aqbali karin degaanada oo dhan. Kuwa lagu tuhmay in ay diin kale qaateen waxaa qashqashaad u geystay xubnaha ka tirsan bulshadooda.

Dowladda Mareeykanku ma aysan ku laheyn dalka dublamaasiyiin si joogta ah u fadhida. Safarradda saraakiisha Mareeykanka ee Soomaaliya waa ay kordheen marka loo fiiriyo sanadihii hore, inkasta oo ay safarraddu ay ahaayeen kuwo ku kooban meelo la xushay markii xaalada amaanku u saamaxday. Wax qabadka dowlada Mareeynka ee in la dhiiri galiyo xoriyada diinta waxa uu ku wajahnaa gacansiinta dadaalada loogu jiro in lagu soo dabaalo xasilooni, dib u soo celinta xukunka sharciga, iyo in loo doodo xuriyadda hadalka iyo kulanda.

Qeybta 1aad: Tirakoobka Diimaha

Dowladda Mareeykanku waxa ay ku qiyaastay tirada guud ee dadka 11milyan (Qiyaastii Luulyo 2017). Ilo kale oo uu ku jiro Bangiga Aduunka ayaa ku qiyaasa tirade dadka ugu yaraan 14 milyan. Sida laga soo xigtay Wasaaradda Diinta ee dowladda federaalka, in kabada 99 boqolkiiba dadka Soomaalidu waa muslimiin Sunni ah. Dadka xubnaha ka ah diimaha kale marka la isu geeyo waa wax ka yar 1 boqolkiiba tirada dadka, waxaana ku jira bulsho yar oo Masiixiyiin ah, Bulsho yar oo Suufiyiin ah, iyo tiro aan la aqoon oo ah Musilimiinta Shiicada, Muhaajiriin iyo shaqaale ajnabi ah, oo sida badan ka yimid wadamada Bariga Afrika, waxa ay sida badan ka tirsanyihiin kooxo kale oo diimeed.

Qeybta 2aad. Xaalada Dowlada ee Ixtiraamka Xoriyadda Diinta.

Qaab Sharciyeedka

Dastuurka Federaalka ee meel gaarka ah (DFK) waxa uu siinayaa shaqsiyaadka xaqa ah in ay ku dhaqmaan diintooda, laakiin waxa uu mamnuucayaa faafinta diin kasta oo aan aheyn tan Islaamka. Waxa uu leeyahay dhamaan muwaadiniinta, iyada oo aan loo eegin diintooda, in ay ku leeyihiin xaquuq iyo waajibaad siman

sharciga hortiisa, laakiin waxa uu ka dhigayaa Islaamku in uu yahay diinta dalka, waxaana uuna farayaa in shuruucdu waafaqsanaato mabaadiida shareecada. Lagama dhaafin dadka aan muslimiinta aheyn in lagu dabakho mabaadiida sharciga ee shareecada. DFK si cad uma mamnuucayo in Muslimiintu ay qaataan diimo kale.

Dastuurada maamul goboleedyada Jamhuuriyadda Somaliland ee waqooyi galbeed, iyo Puntland ee waqooyi bari, waxa ay ka dhigaan Islaamku in uu yahay diinta dalka, muslimiintana waxa ay ka mamnuucayaan in ay diin kale qaataan, waxa ay mamnuucayaan faafinta diin kasta oo aan ka aheyn tan islaamka, waxaa ayna ogolaanayaan in dhamaan sharuucda la waafajiyo mabaadiida guud ee shareecada.

Dastuurka Somaliland waxa uu leeyahay “Qofkasta waa inuu yeeshaa xoriyadda waxa uu aaminsanyahay mana lagu qasbi karo in uu qaato caqiida kale. Shareecada Islaamku ma aqbalayso in qof muslim ah uu ka baxo caqiidadiisa” Dastuurka Puntland waxa uu mamnuucayaa sharci kasta ama dhaqan kasta oo burinaya Islaamka isaga oo mamnuucaya banaanbaxyada kasoo horjeedo Islaamka. Dastuurka iyo sharuucda kale ee Puntland ma qeexayaan waxa ay tahay burinta Islaamka.

Maamul goboleedyada kale, oo ay ku jirtaan MKG, MKH iyo MKKG, waxa ay leeyihiin dastuuro sheegaya in Islaamku yahay diinta rasmiga ah. Dastuuradaasu waxa ay ogolyhiinn dhamaan sharciyadu in ay waafaqsanaadaan mabaadiida guud ee shareecada. MKG, MKH iyo MKKG wali ma aanay qaadan sharciyo si toos ah u tilmaamaya xoriyada diinta.

Xeerka ciqaabta ee qaranka ayaa weli guud ahaan ka jira gobolada dalka oo dhan. Ma mamnuucayo in islaamka laga baxo oo la galo diin kale, laakiin waxa uu dambi ka dhigayaa aflagaadada iyo “sumcad dilada Islaamka”, kaas oo keeni kara ciqaab gaaraysa ilaa laba sano oo xabsi ah.

DFK iyo dastuurka Puntland waxa ay sharuud uga dhigayaan in madaxweynaha, oo ay san ku jirin dadka kale ee xafiisyada haya, in uu ahaado Muslim. Dastuurka Somaliland waxa uu waajib ka dhigayaa in madaxweynaha marka lagu daro, musharaxiinta madaxweyne ku xigeenka iyo wakiilada aqalku ay noqdaan Muslimiin.

Degaanada sida badan garsoorku waxa uu ku tiirsanyahay *xeer* (Dhaqanka iyo caado xeer noqotay), shareecada iyo xeerka ciqaabta. Degaan kastana waxa uu si

gaar ah u habeeystaa una dhaqan galisaa ka hadalka diimaha, sida badanna isma waafaqsana.

Dastuurka Somaliland waxa uu mamnuucayaa in la sameeyo xisbiyo siyaasadeed oo ku saleysan koox diineed gaar ah, caqiido diineed, ama fasiraadda mad-hab diineed, halka DFK iyo dastuurada la ansixiyay ee maamul goboleedyada kale eeysan ku jirin mamnuucidani.

Wasaaradda Arimaha Diinta ayaa u leh awood sharciyeed in ay diiwaan galiso kooxaha diimeed. Tilmaamaha sida loo diiwaan galinayo iyo waxa looga baahan yahay waa mid aan is waafaqsaneyn. Wasaaradu malahan awood ay uga fuliso sharuudahaas meelo ka baxsan Muqdisho.

Somaliland ma lahan qaab loo diiwaan galiyo ururada diimeed ama shuruudo gaar ah oo lagu diiwaan galiyo kooxaha Muslimiinta ah. Dowladda Puntland ma lahan wax sharciyo ah oo nidaaminaya diiwaangalinta ama hab loo diiwaan galiyo kooxo diimeedyada. Maamul goboleedyada kale ma lahan hab lagu diiwaan galiyo ururada diimeed.

Gudaha Puntland, dugsiyadda diinta iyo goobaha lagu cibaadeysto waa in ay ka helaan ogolaansho ay ku howlgalaan Wasaaradda Cadaaladda Iyo Arimaha Diinta. Gudaha Somaliland, dugsiyada diinta iyo goobaha lagu cibaadeysto waa in ay ka helaan ogolaansho ay ku howlgalaan Wasaaradda Diinta ee Somaliland. Sharciga Puntland iyo Somaliland midna ma caddeyn cawaaqibka ka dhalan karta hadii la howlgaliyo goobahaas ogolaansho la'aan. Maamul goboleedyada kale oo dhan waxa ay sharuud uga dhigayaan meelaha wax lagu caabudo iyo dugsiyada diineed in ay ruqsad ay ku hawlgalaan ay ka heystaan masuuliyiinta maxaliga.

Wasaaradda Waxbarashada ee federaalku ayaa leh waajibaadka in ay hebeeyso waxbarashada diimeed dalka oo dhan. Masuuliyiinta federaakla iyo goboladu waxa ay shuruud uga dhigayaan waxbarashada islaamka dugsiyada oo dhan, kuwa dadweynaha ama kuwa gaarka loo leeyahay, marka laga reebo kuwa ay howgaliyaan dadka aan muslimka aheyn. Dugsiyada gaar ah waxa ay heystaan xoriyad dheeri ah oo ay ku go’aansadaan manaahijtooda. Ardayda aan muslimiinta aheyn ee dhiganaya dugsiyada dadweynaha waxa ay codsan karaan in laga dhaafo waxbarashada islaamka, laakiin sida ay sheegeen masuuliyiinta federaalka iyo gobolada, ma jirin codsi noocaas ah.

Dalku waxa uu qeyb ka yahay Heshiisyada Caalamiga ah ee Xuquuda Siyaasadeed iyo tan Madaniga ah.

Dhaqanka Dowladda

Dowladaha federaalka iyo goboladu waxa ay sii wadeen mamnuuciddii lagu soo rogay faafinta diimaha aan ka aheyn tan Islaamka, ma jirin warbixin sheegeysa dhaqangalinteeda. Sida laga soo xigtay saraakiisha federaalak iyo dowlad goboleedyada, ma jirin kiisas dad lagu soo eedeeyay in ay ridoobeen, diin caay, ama magac dil islaamka.

Sida la soo wariyay xukuumadu waxa ay sii waday in aanay si adag u dhaqan galin sharuudaha diiwaan galinta kooxaha diineed ee furanaya dugsiyada caadiga ama kuwa lagu barto diinta. Kooxo badan oo diimeed isma aanay diiwaan galin, laakiin qaar ka mid ah kooxaha diimeed ayaa sheegay in aanay dowladu ka qaadin wax talaabo ah oo ka soo horjeeda iyaga.

Dowladda Soomaliland ma aanay mamnuucin ururada diineed ee aan diiwaan gashaneyn kumana ay soo rogin ganaax lacageed wax urur diineed ah. Intii lagu jiray Luulyo masuuliyiinta Somaliland waxa ay xireen kaniisadii kaliye ee Kaatoolikada aheyd ee ku taalay gudaha Hargeysa; Kaniisada waxaa dib loo furay Oktoobar 2016kii. Masuuliyiinta dowladu waxa ay sheegeen in ay u xireen kaniisadda si ay u ixtiraamaan rabitaanka sida badan dadka muslimminta ah iyo hogaamiyayaashooda diineed oo aaminsaa in kaniisadu ay isku dayeeysay in badasho dadka aaminsan Islaamka. Wasiirka Arimaha Diinta ee Somaliland Shiikh Khaliil Cabdulaahi ayaa si fagaar ah u yiri arintu waxa ay abuurtay kala qeeybsanaan aanay ku jirin maslaxadda [Diinta].

Dowladda Puntland ma aanay mamnuucin mana ay saarin ganaax lacageed wax koox diineed ah.

Bishii Maajo wasiirka waxbarashada, dhaqanka iyo tacliinta sare ayaa daahfurtay qaab manaahij qaran ee dugsiyada dowladda iyo kuwa gaark ah ee dugsiyadda hoose iyo sare, kasoo uu yiri in loo jaangooyay qeybahaan in loogu xakameeyo waxbarashada diineed si wax ku ool ah.

Tacadiyada ay geeysteen Ciidamada Ajaanibta ah iyo kuwa aan dowlad aheyn

Al-Shabaab waxa ay sii waday in ay si rabshadeysan ay ugu soo rogto fasiraadeeda shareecada islaamka iyo ku dhaqankeeda muslimiinta kale iyo kuwa aan muslimiinta aheyn. Ciidamadda al-Shabaab waxa ay bartilmaameedsadeen oo ay dileen saraakiisha dowladda federaalka ah iyo kuwa raacsan, iyago oo ugu yeeray in aanay muslimmin aheyn ama ay ridoobeen. Bishii Juun boqolaal ka tirsan dagaalamayaasha al-Shabaab ayaa u dhacay saldhig ciidan oo ku yaalay Puntland, iyaga oo dilay ilaa 70 qof dhaawacayna daraasiin kale oo dheeri ah mid ka mid ah weerardii ugi dhimashada badnaa ee lala beegtay ciidamada amaanka ee Soomaaliya. Al-Shabaab waxa ay sheegtay in ay u weerareen saldhiga sababta oo ah iyada oo ay joogeen ciidamo ajaanib ah iyo kuwa ridoobay ee Puntland.

Intii u dhaxeeysay 21kii ilaa 24kii Maajo, al-Shabaab waxa ay ka qafaasheen qiyaastii 70 qof, oo ay ku jireen haween iyo caruur, gubeen tiro guryo ah ayna ku kalifeen in ka badan 15,000 oo qof in ay ka cararaan guryahooda intii uu socday weerar ka dhacay Shabeeladda Hoose, sida laga soo xigtay Qaramadda Middobay. Qaar ka mid ah ragii la qafaashay ayaa u sheegay kooxaha u dooda xaquuqul insaanka in aan loo ogolaan in ay tukadaan oo aany heysana biyo ay ku weeseystaan. Sida ku xusan warbixinta Human Rights Watch, ugu yaraan laba dersin ayaa la sii daayay kadib markii qabiilku soo faragaliyay, laakiin tiro aan la aqoon ayaa wali ku jira jeelasha.

Sida laga soo xigtay warbixin uu qoray wargeyska Morning Star News, intii lagu jiray Feberaayo ciidamadda al-Shabaab ayaa dilay dad si qarsoodi ah u galay Masiixiyadda kana baxay islaamka, Faadumo Cismaan, iyo wiil ay dhashay oo 11jir ah ayayeey dileen iyaga oo dhaawacay ninkeeda. Laba gabdhood oo ay dhashay Faadumo Cusmaan iyo wiil ay dhashay oo sagaal jir ah ayaa ka baxsaday waxaana laga helay magaalo kale iyaga oo bad qaba. Janaayo 10, al-Shabaab waxa ay baahiyeen in ay dileen wiil dhalinyaro ah iyo nin da’s yar gudaha Jubadda Dhexe kadib markii ay isu galmoodeen.

Al-shabaab waxa ay sii waday ololeheeda ay ku tilmaamayso xoogagga nabad ilaalinta ee AMISOM in ay yihiin Masiixiyiin u dan leh in ay qabsadaan oo ay heystaan wadanka. Intii lagu jiray Luulyo al-Shabaab waxa ay jidka u gashay kolonyo AMISOM ah gudaha Shabeeladda Hoose taas oo keentay ugu yaraan dhimashada 24 askari. Al-shabaab waxa ay sheegtay in u dileen askarta si ay uga cawdaan sii joogitaanka sii socda ee ajaanibta iyo nabad ilaaliyayaasha ay tababareen reer galbeedku. Sida ay soo sheegtay Human Rights Watch, al-Shabaab waxa ay qafaasheen ciidamo AMISOM ah intii uu socday weerarku. Dowlada Ugaandha waxa ay xaqiijisay todoba ka tirsan ciidamada Ugaandha ee AMISOM oo lagu qabsaday weererkii ka dhacay Janaale 2015 kii in wali la sii haysto. Tiro

aan la ogeyn oo ka tirsan ciidama Kenya iyo ciidamo kale oo ka tirsan AMISOM ayaa wali la sii heystaa.

Sida laga soo xigtay kooxaha samafalka, al-Shabaab waxa ay sii waday in ay ku hanjabaan in ay dilayaan qof kasta oo lagu tumo inuu galay Masiixiyadda. Meelaha ay gacanta ku haayeen, al-Shabaab waxa ay sii waday in ay mamnuucdo shineemooyinka, telefishinada, muusikada, internetka, iyo in la daawado tartanada ciyaaraha. Waxa ay mamnuucday gadida Jaadka (maandooriye caan ah), cabida sigaarka iyo hab dhaqanada ay u aragto in aysan islaam aheyn, sida xiirashada garka. Waxa kale oo ay dhaqan galisay shuruudaha adage ee in haweenku ay qaataan xijaab buuxa.

Sida laga soo xigtay kooxaha bini'aadminimadda, Alshabaab waxa ay sii joogtaysay in ay qashqashaadaan ururada gargaarka bin-aadaminimo ee cilmaaniyiinta ah iyo kuwa ku dhisan caqiidada, iyaga oo u hanjabaya nolosha shaqaalahooda iyo iyaga oo ku eedeeyay in ay raadiyaan in ay Soomalida ka dhigaan Masiixiyiin.

Cabsi laga qabo aargoosad ka yimaada Alshabaab darteed ayaa sida badan ka hor istaagta kooxo diimeedyada in ay si xor ah u howlgalaan. Al-Shabaab waxaa la soo sheegay in ay ku hanjabeen xiritaanka masaajido ku yaala meelaha aya gacanta ku hayaan hadii casharadda laga bixiyo masaajidadu aysan waafaqsaneeyn qaabka kooxdu u fasirto islaamka.

Meelaha ay gacanta ku heeyso, al-Shabaab waxa ay sii waday in ay dugsiyada waajib uga dhigto in ay baraan qaabka jihaadka mintidnimada ah iyagoo ku adkeeynaya in ardaydu ay weerar ku qaadaan kuwa ay u aragto gaalada, oo ay ku jiraan wadamada gobolka, dowlada federaalka iyo AMISOM. Ka dib markii ay soo gudbisay manhajkeeda cusub ee waxbarasho bishii Abriil, al-Shabaab waxa ay billawday in ay ku khasbaan bulshooyinka Hirshabeelle iyo Galmudug in ay ka diiwaan galiyaan caruurta da'doodu u dhaxeeyso todoba ilaa iyo 14 jir dugsiyadda qur'aanka ee ay maamulaan al-Shabaab, sida laga soo xigtay kooxaha bini'aadaminimada. Al-shabaab waxa ay xireen ama ay ganaaxeen waalidiinta ku guul dareeystay in ay u hogaansamaan awaamirtooda. Sida laga soo xigtay kooxaha bini'aadiminimadda, 17kii Juun, maleeshiyaadka al-Shabaab ee gudaha Xaradheere waxa ay xireen 17 oday oo diiday in ay adeecaan awaamiirta kooxda, maalmo ka dib kooxdu waxa ay sii deeysay 15 kamid ah odayaasha oo balan qaaday in ay diiwaan galiyaan 50 caruur ah. 20kii Juun al-Shabaab waxa ay ugu hanjabeen waalidiinta degan tuulooyinka Jowle, dhalwo, iyo Tuul Xaaji iyaga oo diiday in ay ka qoraan dadka da'doodu u dhaxeeyso 10 ilaa 20 jir dugsiyo dhawaan

la furay oo ay maamusho al-Shabaab oo ku yaalay Jowle iyo Xaradheere, sida laga soo xigtay kooxaha samafalka. 4tii Luulyo, kooxaha bini'aadinimadda waxa ay soo wariyeen in ugu yaraan 100 oday, imaamyo iyo macalimiinta dugsi quraanka ee aan ku xireyn al-Shabaab in lagu xiray agagaarka Warshubo, Xarardheere, iyaga oo ka cagajiiday dalabkii iska diiwaan galinta dugsiyadda al-Shabaab. Warbixinadda ka imaanaya kooxaha bini'aadanimadda ayaa tilmaamay in bilaawgii Luulyo al-Shaabab ay ka qafaasheen ugu yaraan 45 oday Ceelbuur markii ay ku guul dareeysteen in ay 150 caruur ah ay ku wareejiyaan kooxda.

Alshabaab waxa ay baad sareeysa iyo Sakawaad aan la saadaalin karin (Waajibaad Islaami ah ee in sadaqo la bixiyo inta lagu jiro Ramadaan) iyo Sadaqo (Sadaqo mutadawacnimo ah oo ay bixiyaan muslimmintu) iyo canshuur ku soo rogeen meelaha ay gacanta ku hayaan, sida laga soo xigtay kooxaha bini'aadminimada.

Koox yar oo ah dagaalamayaasha ISIS ayaa sii joogay Puntland waxa ay na ahaayeen kuwo u ololeeya shareecada. Marka ay ugu xooga badnaayeen waxaa si hoose loogu qiyaasay (qiyaastii 200 dagaalamayaal), laakiin kooxdu waxa ay ku naaloodeen xoriyad ilaa xad ah oo ay ku dhaqdhaqaaqaan iyo in ay ka soo qortaan gudaha tuulooyinka ku hareeraysan buuraha Golis.

Qeybta 3aad. Xaaladda Ixtiraamka Bulsho ee Xoriyadda Diimaha

Waxaa la soo wariyay sii socoshada cadaadis bulsho oo xoogan oo ah in lagu dhaqmo caadadda suniyiinta Islaamka.

In laga baxo Islaamka oo la galo diin kale waxa ay sii aheyd mid aan bulshadu aqabali karin, shaqsiyaadka lagu tuhmo in ay ka baxeen diinta iyo qoysaskooda wax la soo sheegay in ay muteeysteen qashqashaad uga imaaneeysay xubnaha bulshadooyinkooda maxaliga ah.

Masiixiyiinta iyo xubnaha kooxaha kale ee diineed ee aan islaamka aheyn waxaa la soo sheegay in aysan awood u leheyn in ay si furan ugu dhaqmaan diintooda iyaga oo ka baqayay qashqashaad sida badan wadanka oo dhan. Bulshada masiixiyiinta ah ee yar waxa ay sii wadeen in aysan is muujin marka ay timaado caqiidadooda diineed iyo ku dhaqankeeda. Kooxaha kale ee aan Islaamka aheyn waxa ay u muuqatay in ay ka fogaadaan in ay si furan ugu dhaqmaan diintooda.

Ma jirin goobo dadweyne oo ay wax ku caabudaan dadka aan Muslimka aheyn qeybaha kale ee dalka.

Dugsiyada gaarka ah ayaa ah ilaha waxbarasho ee ugu horeeya. Intooda badan waxaa laga bixiyay daruusta diinta Islaamka. Dugsiyada diinta ee laga soo maaligaliyay dibadda oo ku baahsan dalka waxa ay bixiyaan waxbarasho asaasi ah oo jaban, qaar badan oo ka mid ah waxa ay qaateen aydiyoolajiyada Salafiyiinta, gaar ahaan meelaha ay al-Shabaab gacanta ku hayeen.

Qeybta 4aad. Siyaasada Dowlada Mareeykanka

Safaradda ay saraakiisha Dawladda Mareykanku ay ku tageen dalka waxa ay ahaayeen kuwo sii kordhayay intii lagu jiray sanadka, inkasta oo safaradu ay ahaayeen kuwo ku kooban meelo la xushay iyo kaliya marka ay xaalada amaanku ay saamaxdo. Saraakiisha safaaradu waxa ay la kulmeen saraakiisha Wasaaradda Arimaha Diinta iyo hogaamiyayaasha diimaha si ay ugu doodaan dhiiri galinta dulqaad diimeed. Dadaalka dawladda Mareykanka ee in la dhiiri galiyo xoriyadda diintu waxa uu ku jiheysanyahay in la taageero dadaalada dowlada ee ah in la helo degenaan, dib loo soo celiyo ku dhaqanka sharciga, iyo in loo doodo xoriyadda hadalka iyo isu imaatinka.